



Waxaa laga soo turjumay af-iswiidhish

Ku saabsan feyruska cusub ee corona

Macluumaadkan wuxuu ku socdaa adigaaga goor dhaweyd ka yimid aagagga uu ku faafyay feyruska cusub ee corona.

Maxaad u baahantahay in aad sameysid?

Adigaaga, 14-ki maalin ee ugu dambeeyay ka hor, joogay aag uu faafidda cudurku weli ka taaganyahay:

- Haddii aad isku aragtid calaamadaha cudurrada neef mareenka sida qufac, culeys xagga neefsashada ah ama feebaro – wac Hagaha caafimaadka ee 1177 (nambarka taleefanka 1177) si aad iswiidhish ama ingiriis kalkaaliso caafaimaad talo ugaga.

Sidan ayaad isu ilaalin kartaa, dadka kalana u ilaalin kartaa

- Ha illoobin in aad laabatada xusulka ku qufacdid, kuna hindhicistid.
- Gacmaha ku dhaq saabuun iyo biyo.



Ku saabsan cudurka covid-19

Ma qabtaa su'aalo?

Macluumaadka maanta taagan iyo jawaabo ku aaddan su'aalaha ugu badan ee la is weydiyo ka eeg

www.folkhalsomyndigheten.se/



Laga soo billaabo Diseembar 2019 waxaa dalka Shiinaha ku faafayay cudurka cusub ee corona. Cudurka oo uu feyrus keenyo waxaa loo bixiyay magaca covid-19. Dadka badankooda waxaa ku dhaca xanuun yara fudud oo laga dareemayo neefmareenka oo iskiisa isaga reysta, laakin dadka qaarkood waxaa ku dhaca cudur intaas ka khatarsan sida caabuqa sambabaha. Feyruska waxaa la isugu gudbiyaa iyadoo xiriir lala sameeyo qof xanuunsanaya ama marka uu qofkaasi qufaco ama hindhisyoодо, waxa loogu yeero dhibcin ku qaadsiinta. Khatarta ah in lagu qaadsiyo waa ay ka weyntaha tan dadka kale haddii aad tagtay aag uu cudurku ku faafyay ama aad si dhaw xiriir ula lahayd qof uu ku dhacayay cudurka feyruska corona ee cusub.